ROBBINSDALE
Area Schools

Heshiiska Adeegsiga Waalidka: Aaladda Dijitaalka ah (2020-2021)

Dugsiyada Aagga Robinsdale waxay marin u siinayaan arday kasta ee dhigta fasalada Xanaanada ilaa fasalka 12aad aalad dhijital ah. Qalabkan ayaa loo adeegsan doonaa in lagu xiro iskuullada ardayda iyo qoysaska, u oggolaanaya ardayda inay u muujiyaan nafsadooda qaabab cusub oo xiiso badan, oo si shakhsi ahaaneed loogu habeeyo waayo-aragnimada waxbarasho ee arday kasta.

Aaladaha Dhijitaalka
Aaladdaha dhijitaalka ah badanaa waa aaladda Koromebuugga ama iPad-ka. Helitaanka marin internetka ayaa looga baahan yahay inta badan shaqada ardayga si loo xafido loona wadaago. Haddii ilmahaagu uusan lahayn marin internet, fadlan kala xiriir dugsigaaga wixii xog ah ee ku saabsan ikhtiyaarada internetka ee qiimaha jaban ee qoyskaaga. Goobo kala duwan oo bulshada ka mid ah ayaa sidoo kale bixiya internet bilaash ah, oo ay ku jiraan maktabadaha dadweynaha.

Qorshaha badbaadada aaladda
Dadaalka looga ilaaliyo qoysaska kharashaadka aan la aqoon ee ku dhici kara ee tuugada ama waxyeelada shilka ah inta uu qalabku ku jiro daryeelka canuggaaga, degmadu waxay bixinaysaa qorshaha ilaalinta aaladda. Qorshaha badbaadada aaladdu waxay ku kacaysaa $ 25 sannad dugsiyeed kasta, arday kasta. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid qorshaha ilaalinta aaladda, fadlan la xiriir maamulka dugsiga.

- Qorshaha badbaadintu wuxuu daboolayaa waxyeelada shil ahaaneed ee ugu horeysa. Waxa laga goynayo ayaa lagu dabbaqi doonaa dalabyada xiga.
- Qorshaha badbaadada aaladdu ma daboolayo xamuul-qaadaha ‘charger’ iyo galka.
- Haddii aaladdaada la xado, keen caddayn ah warbixinta booliska ee xereeyay.
- Qorshaha badbaadada aaladdu ma daboolayo khasaaraha ay yimaadda si xun u adeegsiga.

Dadaalka looga ilaaliyo qoysaska kharashaadka aan la aqoon ee ku dhici kara ee tuugada ama waxyeelada shilka ah inta uu qalabku ku jiro daryeelka canuggaaga, degmadu waxay bixinaysaa qorshaha ilaalinta aaladda. Qorshaha badbaadada aaladdu waxay ku kacaysaa $ 25 sannad dugsiyeed kasta, arday kasta. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid qorshaha ilaalinta aaladda, fadlan la xiriir maamulka dugsiga.

Aaladaha dhijitaalka iyo agabyadu waa hantida Dugsiga Aagga Robbinsdale waana in lagu soo celiyaa Dugsiyada Aagga Robbinsdale dhammaadka sannad dugsiyeed kasta ama marka laga baxo dugsiga. Ganaaxyada waxaa loo qiimayn doonaa waxyeelada dayacaadda ah, qalabka lumay, xamuul-sidaha ‘charger’, ama galka. Aaladaha iyo agabyada aan lagu soo celinin taariikhda ardayga laga saaray iskuulka waxaa loo wargelin doonaa sida xatooyo waaxda booliiska maxaliga ah.

Mas’uuliyadda Adeegsiga iyo Daryeelka Aaladda
Fadlan ula dhaqan aaladda si taxaddar leh una hubi in ardaygaagu:

- Keeno aaladda dugsiga maalin kasta, iyadoo si buuxda u jaaj-garaysan.
- La dhigo lagu jaaj-gareeyo aaladda meel aammin ah, dhowrsan.
- Adeegsado galka la siisyay oo taxaddar muujiyo marka uu aaladda qaadayo.
- Soo wargeli wixii dhibaato ama waxyeello ah macallinka ama shaqaalaha xarunta warbaahinta maktabadda isla markiiba.

ROBBINSDALE
Area Schools

Saxeexidda kaarka qirashada micnaheedu waa inaad kala hadashay ardaygaaga mas'uuliyadda adeegsiga iyo daryeelka saxda ah ee aaladda. xoojinta u adeegsiga aaladda ujeeddooyin waxbarasho.

Ilmahaagu wuxuu mas'uul ka noqon doonaa u hoggaansanaanta Adeegsiga Nidaamka Nabdoon ee loo Aqbali Karo ee Degmada (524) iyo Nidaamka Mamnuucidda Xoog-Sheegashada (514) sida lagu qeexay Buugga-gacmeedka Ardayga: Xuquuqaha iyo waajibaadka

Ururka Dareenka Guud ee Warbaahintu 'The Common Sense Media' waxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan dhalashada dijitaalka ah iyo hagitaanno looga hadlayo isticmaalka teknoolojiyadda qoyska.

2020-2021 Qorshaha Ilaalinta Qalabka iyo Kharashaadka Burburka / Beddelidda

Qorshaha Ilaalinta aaladda

Dadaalka looga ilaaliyo qoysaska kharashaadka aan la aqoon ee ku dhici kara ee tuugada ama waxyeelada shilka ah inta uu qalabku ku jiro daryeelka canuggaaga, degmadu waxay bixinaysaa qorshaha badbaadada aaladda. Qorshaha badbaadada aaladdu waxay ku kacaysaa $ 25 sannad dugsiyeed kasta, arday kasta. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid qorshaha ilaalinta aaladda, fadlan la xiriir maamulka dugsiga.

- Qorshaha badbaadintu wuxuu daboolayaa waxyeelada shil ahaaneed ee ugu horeysa. Waxa laga goynayo ayaa lagu dabbaqi doonaa dalabyada xiga.
- Qorshaha badbaadada aaladdu ma daboolayo xamuul-qaadaha 'charger' iyo galka.
- Haddii aaladdaada la xado, keen caddayn ah warbixinta booliska ee xereeyay.
- Qorshaha badbaadada aaladdu ma daboolayo khasaaraha ay yimaadda si xun u adeegsiga.

Faahfaahinta Qorshaha Badbaadada Aaladda:

Qorshaha Badbaadada Aaladda	
Qorshaha Badbaadada Aaladda	$25

Waxa loo goosanyo Burburka	Leh QBA	QBA la'aan
Dhacdada ugu horraysa (sannad dugsiyeed kasta)	Bilaash	$60
Laba dhacdo ama in ka badan (dhacdo kaste sannad dugsiyeedkiiba) *	$25 (kiiba)	$60 (kiiba)

**Waxay kaloo abuuri kartaa gudbinta anshaxa ee "si xun u adeegsiga teknolojiyada".*

***Qorshaha badbaadada aaladdu ma daboolayaan waxyeelada ula kac ah. Kharashaadka dayactirka dhammaystiran ama beddelaadda ayaa loo qiimayn karaa ardayga.*

Waxa loo goosanayo Xaditaanka ama Lumista	Leh DPP	DPP la'aan
Xatooyo wadata warbixin boolis	$50 (kiiba)	$100 (kiiba)

(dhacdo kaste sannad dugsiyeedkiiba)		
Lumin dayacaad awgeed (dhacdo kaste sannad dugsiyeedkiiba)	$100 (kiiba)	$150 (kiiba)